

# GUDDOOMIYE INSLEE

## AYAA KU BAAQAY XEER CUSUB OO KU MEEL GAADH AH OO LOO YAQAAN BRIDGE PROCLAMATION

(Dhaqangelaya Julaay 1 - Sebtember 30, 2021)

**TANI MAAHA MUDDO KORDHIN LOO SAMEEYAY GO'AANKA HAKINAYA GURI KA-SAARIDDA EE KA SOCDA GOBOLKA. GO'AANKA HAKINAYA GURI KA-SAARIDDA EE KA SOCDA GOBOLKA WUXUU DHACAY JUUN 30-KEEDII. LAMA KORDHIN ILLAA 30-KA SEBTEMBAR. (WAXAA JIRA MAAMULO AAN KORDHININ HAKINTA GO'AANKA GURI KA-SAARIDDA.)**

Kiraystayaasha ku noolaa hudheelada/albeergooyinka/AirBnBs/xarumaha daryeelka muddada-dheer iyo guryaha kale ee aan dhaqameedka ahayn **LAGUMA ILAALIN DOONO XEERKA BRIDGE PROCLAMATION.** Waa laga saari karaa guryahooda laga bilaabo 1-da Luulyo, 2021.

### WAA KUWEE KA-SAARITAANADA LA OGGOL YAHAY?

Dhammaan ka saaritaanada caadiga ah ee uu oggol yahay sharciga (HB 1236), marka laga reebo bixin la'aanta kirada, **WAY SII SOCON KARTAA ILAA 1-DA LUULYO.**

Tani waxay ka dhigan tahay in mulkiiluhu uu bilaabi karo howsha guri ka-saaridda ee ku saabsan jabinta heshiiska kirada laga bilaabo 1-da Luulyo

### KA WARAN LACAG-BIXINTA IJAAR LA SOO DAAHDA IYO KIRADA OO KORODHA?

Lacagaha soo daaha weli waa mamnuuc illaa Disembar 31, 2021.

Kordhinta kirada waa la oggol yahay laga bilaabo 1-da Luulyo, laakiin waxay u baahan tahay \*60 maalmood oo ogeysiis qoraal ah ka hor inta aysan dhaqan gelin.

**\*TANI WAXA LAGA YAABA IN AANAY KHUSEYNIN KIRAYSIGAAGA GAARKA AH. FADLAN NA SOO WAC HADDII AAD QABTID SU'AALO.**

### KIRADA AAN LA BIXININ LAGA BILAABO FEBRAAYO 29, 2020 - JULAAY 31, 2021:

LMulkiiluhu wuxuu bilaabi karaa howsha guri ka saaridda **KELIYA HADDII:**

- Barnaamijyada kaalmada kirada ay ka shaqeeyaan degmadaada, iyo;
- Barnaamijyada dhexdhexaadintu ay ka shaqeeyaan degmadaada, iyo;
- Ay siiyaan kiraystaha ogeysiis qoraal ah (nuqul warqad ah ama elektiroonig ah) oo ah in barnaamijyadu shaqeynayaan ayna kuu hergeilnayaan inaad kaqaybqaadato, iyo;
- Aad diido ama aadan ku jawaabin 14 maalmood gudahood

### MULKIILAHAAGU WAA INUU KU SIIYAA QORSHE DIBU-BIXIN AH!

### MAXAA LOO ARKAA INAY SHAQAYNAYAAN?

Shaqaynayaan waxay ka dhigan tahay in barnaamijka kaalmada kirada ay u xaqiijisay Waaxda Ganacsiga iyo barnaamijka dhexdhexaadinta ee AOC (Xafiiska Maamulka ee Maxkamadaha), OCLA (Xafiiska Caawinta Sharciga Madaniga ah) iyo OFM (Xafiiska Maareynta Maaliyadeed). Labaduba waxay u baahan yihiin in lagu dhejiyo degmadaada ama shabakadda maxkamadda.

### MARKA HADDII MILKIILAHAAGU KU SIIYAY QORSHE DIB-U-BIXIN AH, MAXAA XIGA HADDA?

Qasab maaha inaad aqbasho, laakiin waa inaad kaga jawaabtaa 14 maalmood gudahood.

**HA DHAYALSAN. HA KA GUURIN. MILKIILAHAAGU GURIGA KAAMA SAARI KARO AMAR MAXKAMADEED LA'AANTIIS.**

## HADDII MULKIILAHAAGU KU SIIYO QORSHE DIB-U-BIXIN AMA UU KU SIIYO OGEYSIIS GURI KA SAARID AH:

1-855-657-8387

(206) 267-7069

(KA BAXSAN DEGMADA KING)

(DEGMADA KING)